

## **Amaahsashada waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado**

Waxyaalahaan oo caawinaad ahaan loo adeegsado waa amaah oo aad ka qaadatay Maamulka Gobolka Västmanland. Waa inaad dib u soo celisa markii aad ka maarmi karto oo aadan u baahnayn.

Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa inaad dib ugu soo celisaa:

- Xarumaha daryeel-caafimaadeedka ee Gobolka ku yaalaan
- Xarunta Baxnaaniska [Habiliteringscentrum]
- Xarunta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado [Hjälpmedelcentrum]
- Hawlwadenaha ku siiyay ama ku qoray waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado.

Waa mamnuuc in waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado qof kale la siiyo, maadaama waxyaalaha qof gaar ahaan loogu tijaabiyay oona qofkaas gaar ahaan loogu qoray in u isticmaalo.

### ***Habka waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado lagu qoray loo daryeelo***

Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in la daryeela lana nadiifiya hab waafaqsan tilmaan-bixinta ku lifaaqan. Waxaad xaq ku leedahay dayactirida iyo wixii adeeg ee xiriir la leh waxyaalihii aad amaahatay. Haddii dayactirid u baahan tahay la xiriir Xarunta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado [Hjälpmedelcentrum] – isticmaal adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] ee laga helo barta internetka [1177.se/hjalpmedel-vastmanland](http://1177.se/hjalpmedel-vastmanland) ama ka wac 021-17 30 48. Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in hab sugan loo kaydsho oona waxyeelid laga ilaalin karo. Markii aad u baahnayn isticmaalkooda waa inaad dib u soo celisa iyagoo si fiican u nadiifsan.

Haddii la xado waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in ciidanka booliska la wargeliyaa oona kaddib Hjälpmedelscentrum loola xiriiro.

Hjälpmedelscentrum, Signalistgatan 2, Västerås. Miiska macaamiisha: 021-17 30 48

Isniin-khamiis 8–16.30, jimce 8–16 (saacadaha 7-8 dib u soo celin iyo ka qaadashada waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado oo kaleliya)